# *MALÅ MED ALLT SÅ NÄRA*
# *Ku soo dhawow degmo ammaana oo horumar laga sameeyo!*

**Ku soo dhawow inaad deggenaato, ku noolaato oo aad ka qayb qaadato degmada Malå!**

*Waa maxay faa'iidooyinka kuugu jira adiga iyo qoyskaagaba haddii aad doorato Malå?*

Way fududahay in la deggenaado oo lagu noolaado Malå. Dadka dhawaansho ayaa ka dhexeeya waxkastaana meel dhow ayay ugu yaalaan: dukaamada, meesha dhakhtarku ku yaalo, dhakhtarka ilkaha, dugsiga, buurta barafka laga fuulo (slalombacke), mootada loogu talagalay in barafka lagu kexeeyo (skoter),- iyo meelaha loogu talagalay in ulaha barafka lagu socdo (skidspår) iyo shaqadaba. Arrintaasi waxay keenaysaa inuu istereesku kaa yaraado, wakhti badani kuu soo haro wakhtigaas oo aad reerkaaga, saaxibadaa iyo waxa aad jeceshahay inaad samayso aad gelinkarid. Dhowaanshaha waxaad ka heleysaa kulan adiga kuu khaasa, nabadeglyo iyo adeeg wanaagsan, oo aad ka hesho dhinaca degmada, bulshada rayidka ah, shirkadaha iyo ururadaba.

Miyaad ku daashay markay baabuurtu safka galaan, kharashyada laga bixiyo marka baabuurka baarkeerinka la dhigo (p-avgifter) iyo kirada guryaha la deggo laga bixiyo oo qaali ah waxay markaa degmada Malå diyaar u tahay inay kugu casunto fursado khaas ah oo ku saabsan guryaha la deggo iyo nolol hodan ka ah bay'ad qurux badan oo farxadi ku jirto marka uu qofku firaaqada yahay wuxuu Malå ka helikaraa meelo duura ama dhir ah, webiyo iyo dhul baadiye ah. Buur iyo bad waxay u jiraan dhowr saacadood  oo keliya. Markay noqoto masaafadaha ay ku jiraan magaalooyinka waaweyn iyo jaamacaduhu iyaguna waa sidaa oo kale. Xiriirka dhinaca is-gaarsiinta ee gaadiidku wuu fiican yahay.

Mujtamaca degmada Malå waa bulsho xasiloon oo ammaana inuu qofku ku barbaaro oo uu ku koro. Halkan waxa lagu yaqaanaa wax soo saarka gacansiga, wershedaha iyo dadka qandaraasyada qaata, horumar iyo kobcid wanaagsan, qaybta hay'adaha dawladu waa qayb muhiima. Degmada Malå waxa jira horumar dhinaca shaqadaha ah oo xiiso badan u leh qof heer jaamacadeed waxbarashada ka gaaray sida adiga oo kale iyo kuwa doortay inay ka shaqeeyaan shaqooyinka farsamada gacanta. Markay noqoto fursadaha dhinacyada shaqooyinka wakhtiga xagaaga la qabto, shaqooyinkii hore looga shaqayn jiray in dib loogu noqdo iyo inay dhalinyaradu baraktiig sameeyaan si ay suuqa shaqada u soo galaan waa furasado iyaguna jira.

Malå waa meel dadku isu furan yihiin, talooyinka layska dhegeysto oo dadku aanu kala soocnayn oo ay dadku isku xisaabtamaan – cidwaliba halkan waa lagu soo dhawaynayaa qofwalibana waa muhiim: gabdhaha yaryar, wiilasha yaryar, dumarka iyo raga, dadka waaweyn iyo dhalinyarada, kuwa iswiidhishka ah- iyo kuwa ajaanibka ahba. Waxaanu annagu jecelnahay inaad rumaysato oo aad ku adkaato gacansiga adiga kuu gaarka ah iyo mustaqbalka Malå.

Hadda waxa lagu dadaalayaa in guryo cusub oo dadku kiraystaa laga dhiso degmada Malå, laakiin haddii aad doonayso inaad degto bangalo adiga kuu gaara waxaad heleysaa guryo u qalma oo aad qiimo wanaagsan ku helaysid inaad ku gadato, waxaanad ka dhex heleysaa

mujtamaha yar ee Malå ama tuulooyinka yar yare ee u dhow dhow. Waxa kaloo iyaguna jira dhul banana oo loogu talagalay in guryo yar yar laga dhisto haddii aad doonayso.

Annagoo ah dadka ka shaqeeya adeegyada is-dhexgalka iyo dadka degmadayada u soo guuraba waanu ka caawinaysaa sidii aad adiga iyo qoyskaaga kula socdaada halkan ugu soo guuri lahaydeen.Waxaanu ku kala tusaynaa bulshada aad u soo guurtay sida ay u dhisan tahay: sidii aad meelaha kala duwan ula xiriiri lahayd, waxaanu ku siinaynaa warbixino ku saabsan adeegyada suuqa yaala ee la bixiyo iyo in aanu kaa caawino waxyaabaha aad u baahan tahay si aad Malå u baratid. Waxaanu annagu la shaqaynaa Xafiiska shaqada oo xafiis ku leh guriga degmada laga xukumo iyo dadka shaqo bixiyeyaasha ah.

Ku soo dhawow Malå!

Wixii su’aalo iyo fikrado ah halkan fadlan kala soo xiriir: inflyttarservice@mala.se

**Waxyaabo xaqiiq ah oo ku saabsan Malå Kommun/Máláge:**

- Degmada Malå waxay ku talaalaa gobolka Västerbottens län, ee Lappland.
- Malå waxa deggen dad qiyaastii gaaraya 3100 baaxada uu dhulkeedu ku fadhiyaana waa 727,48 km².
- Bulshada Malå waxay ku taalaa meel bartame ah waxaany leedahay in ka badan 70 tuulo, meelaha ugu waaweyni waa Adak, Rentjärn, Lainejaur, Rökå och Aspliden.
- Haddii aad gaari ku timaado waxa Malå ku taalaa Wadada ama Jidka 370.
- Basaska loo soo raaco Malå waxaad ka heleysaa bogga internetka ee www.tabussen.nu. Marka Stockholm tareenka loo raacayo waxa laga raacayaa Bastuträsk. www.sj.se. Waxa jira dhowr meelood oo ku yaala agagaarka Malå oo garoomo diyaaradaha laga raaco leh: sida Arvidsjaur, Lycksele och Skellefteå, www.sas.se, www.nextjet.se. Marka diyaarada Stockholm laga soo raacayo waxay qaadanaysaa qiyaastii halsaac.
- Warshadaha ugu waaweyn waa meelaha macdanaha laga qodo, kaymaha ama duurka hirta laga jaro iyo warashadaha alwaaxda lagu sameeyo, ganacsiga cawsha (rennäring), ganacsiga waxyaabaha la iibiyo iyo gaadiidka .
- Dadka deggen magaalada/bulshada Malå waxay ka kooban yihiin dad ka kala yimi 49 wadan. Malå waa meel dhaqamo kala duwan leh.
- Malå waxa ku yaala dugsiyada ugu wanaagsan ee gobolka Västerbotten, sida ay qoreen Ururka weyn ee macalimiinta kulmiya (Lärareförbundet), taas macnaheedu waa inay Malå soo gashay booska 19 aad ee wadanka oo dhan (sannadkii 2016). Malå waxay leedahay dugsiga ugu wanaagsan ee muusiga – iyo dhaqamada laga barto ee gobolka Västerbotten, sida ay qoreen Ururka weyn ee macalimiinta (Lärareförbundet) (sannadkii 2015).
- Guryaha yar yar ee la gato kuwaas oo qofka gadanaya iyo qofka laga gadayaaba ay heshiis ku yimiin wuxuu qiimahooda dhexdhexaadka ahi ahaa tkr: 423 (sannadkii 2012).

- Malå waa magaalada dhinaca koonfurta ugu xigta markay noqoto tuulooyinka kaymaha leh ee tuulooyinka samiska laga soo bilaabo 2010kii waxay ku jirtaa degmaayinka ay dadka samiska la yiraahdaa maamulaan oo ay gacanta ku hayaan.
- Shaqa la'aantu waxay ahayda : 6,6 % (2015).
- Carruurta yar yar ee ku dhalatay Malå: waa 37 (sannadkii 2016).

**Meelaha lala xiriirayo:**

Cinwaanka booqashada (Besöksadress): ee degmada Malå , Storgatan 13, 930 70 Malå

Tfn växel: 0953- 140 00, Fax: 0953 -142 98
www.mala.se

www.visitmala.se

Nagal soco bogga facebook: @malamedalltsanara

**Wax walbaa Malå way kuu dhow yihiin!**

*”anigu waxaa ahay qof gurigeedii dib ugu soo laabtay waxaan la kulmay intii aan magaalada Umdeå wax ka baranayey Albin. Wuxuu shaqada gacanta laga qabto ee tamarta korontada laga dhaliyo (vindkrafttekniker) ka arkay joornaalka shaqadaas oo laga rabay Malå markaas fikir ayaa igu dhasahay inaan halkan u soo guuro, kadibna shaqadii ayuu codsaday waanu helay. Anigu waan ogaa inaan jeclahay deggenaansha Malå sababtoo ah si wanaagsan ayaan halkan ugu barbaaray sidoo kale labadaydii waalid iyo hooyaday waalidkeedba halkan ayay sidii u deggenaayeen, sidaas daraadeed shaki igamagelin inaan halkan u soo guuro! Intaa waxa ii dheerayd fardo ayaan lahaa, taasina waxay keentay wax waliba inay ii fududaadaan markay noqoto u dhawaanshaha fardaha iyo guriga oo isudhow. Waxa aniga iyo Albin na farxadgeliyaa waa xilliga “jiilaalka markuu aad qaboobaado” sababtoo ah waxaanu xiisaynaa inaanu fuulno mootooyinka barafka la fuulo (skoter), kadibna waxa jirta buur xilliga barafka la fuuulo oo meel bartamaha ku taala iyo u gaarsiga. Shaqaduna waa qayb muhiim ah, taas oo iyaduna halkan ku taala markii aanu halkan u soo guurnay ee aanu carruur isu dhalay” / Lina oo mas'uul ka ah arrimaha degmada.*

Ma ogtahay in Malå marka magaca samiska lagu sheegayo inay tahay Máláge? In Adak ay ahayd meel filimaanta loogu dabbaaldegey qarnigii 40-aad ama in marmar lagu kexeeyo mootooyinka barafka lagu fuulo biyaha korkooda ee halkan? Miyaad ogeyd in kursiga dheer ee looxa ah (lave) in berigii hore lagu isticmaali jiray shaqooyinka marka macdanta la qodayo, hadda wuxuu yahay wiishka la fuulo marka buuraha Tjamstanbackarna la korayo, waxaanay ka mid tahay meelaha ugu booqashada badan leh marka barafka ulaha lagu fuulayo? Ma ogtahay adigu, in aanay waxani run uun ahayn ee ay xitaa adiga kuu tahay wax aad goob joogto u ahaato oo aad aragtid kadibna aad baaritaan ku samaysid…

Bilowga hore waxa laga yaabaa inay wax la yaableh Malå kugu noqoto, markay noqoto dadweynaha deggen iyo baaxada uu dhulka degmadau ku fadhiyo, waxa laguu sheegayaa inay “wax waliba” “dhowyihiin”. Laakiin markaad istaagto cirifka ugu sareeya ee buurta Tjamstanberget, taas oo ku taala mujtamaha magaalada Malå dhexdeeda, markaa waxa kuu muuqanaya dhawaanshaha iyo fursadaha isku dhafan ee wanaagsan oo ah inaad farxad ku joogto. Waxa markiiba ishaadu ku dhacaysaa dabeecada ama dhulka weyn ee leh dhir iyo

bilicda. Duur, biyo qulqulaya ama biyo mareen, buuro iyo dhul jilicsan oo biyo fadhiisin leh oo caws badani ku yaalo. Waxyaabahaas oo dhami waxay xiriir toos ah la leeyihiin bulshadaas shucuurteeda nololeed.
Halkan wax aka socda wax sooraa hadday noqoto alaabo iyo adeegyo, sida dharka iyo waxyaabaha kale ee la gato, waxyaabaha lagu maaweeloobo, dugsiyada iyo daryeelka ama xannaanada. Waxay noqonaysaa in laysku dhafo oo goob joog loo ahaado xasillooni ama deggenaansho iyo dhaq dhaqaaq oo inta badan keenaysa wax xiiso leh.

Waxkasta oo u dhexeeya buuro iyo bad halkan waa laga heleyaa. Deggenaansho iyo xasillooni ama aktiifiteetyo, doorashada adiga ayaa iska leh. Waxaad helikartaa inaad waxyaabaha ay dabeecadu kuu dhowi kuu soo bandhigtay aad ka faa'iidaysato. Biyo wanaagsan oo si fudud aad uga kaluumaysankartid, waxaad haysataa fursad aad ku soo lugaysid, aad ku kaxaynkartid mootooyinka barafka la fuulo ee lagu kexeeyo (köra skoter), aad barafka ulaha lagu fuulo ku fuulikartid (åka skidor), kabaha barafka lagu cararo aad ku cararikartid (skridskor), iyo waxyaabo kale. Goob joog u ahoow maalinkasta, iftiinka waqooyiga haddii kale iska dhegeyso aamusnaanta.

Sannadka gudihiisa waxa si gaar ah iyadana loo qabanqaabiyaa munaasabado badan: dhaqan, matooro, bay'adda ama dabeecada, ciyaaro, waxyaabaha ay ka kooban yihiina waxa hubaala inay kala duwan yihiin, laakiin natiijadu waa isku mid – nolol, dhaqdhaqaaq iyo in lala kulmo dad kala duwan.

Magaalada Malå waa tuulo ay dadka samigu leeyahay oo ku taala meesha ugu koonfuraysa wadanka Iswiidhan. Waxa ku jira qayb ka mid ah Sápmi, eeriyadan waxa deggen dadka samiga ah, iyaga ayaa ka shaqeeya warshadaha oo ku takrifala bay'adda ku xeersan. Lappstaden waxay ka kooban tahay 20 guri oo ay dadka samerku dhaqan u leeyihiin inay dhistaan iyo 21 guryaha sida istoodhada u samaysan ee ay dadka samerku isticmaalaan (härbren) waxaanu ka mid yahay dhaqanka noloshooda. Waxa kale oo iyaduna jirta meelo qurux badan oo dabiici ah oo ku taala Koppsele waana meesha ugu da'da weyn ee dadka samerku ay deggenaayeen ee degmadu leedahay, meelahaasi waxay weli kuu soo bandhigayaan dabeecad run ah iyo taariikh nool.

Hadday noqoto inaad booqasho noogu timaado, ama aad ka mid noqoto dadka degmada fursada u helay inay deggaan oo nolol maalmoodkoodu ka mid noqdaan degmada, marwalba waxaanu ku leenahay ku soo dhawow Malå.

Dhaqanka- iyo qaybta wakhtiga firaaqada
Waxaad kaloo eegtaa bogga internetka: www.visitmala.se

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Macluumaadka dalxiiska Malå<br>Skolgatan 2A<br>Tfn. 0953-142 91 | Maktabada Malå<br>Skolgatan 2A<br>Tfn. 0953-142 00 | Malå Dugsiga dhaqanka<br>Skolgatan 2C<br>Tfn. 0953-140 98 | Goobta wakhtiga firaaqada Kosmos<br>Skolgatan 2E<br>Tfn. 0953-141 00 | Hoolka dabaasha ee Malå<br>Hotellgatan<br>Tfn. 0953-140 88 |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Hoolka isbooriga Malå Hotellgatan Tfn. 0953-141 25 | Tjamstanvallen garoonka kubadda cagta Hotellgatan Tfn. 0953-140 65 | Guriga fardo fuulka Malå Storgatan 69 C Tfn. 0953-140 65 | Hoolka barafka Baraf dhalo ah Hotellgatan Tfn. 0953-140 65 | Tjamstanbackarna Laven, Hotellgatan Telefon: 0953-142 89 | Tjamstan goota wakhtiga firaaqada Hotellgatan Tfn. 0953-140 58 |

**Ka shaqaynta Malå!**

Iyadoo ay iskaashanayaan wax soo saarka ganacsiga iyo wershaduhu, Xafiiska shaqada, shirkadaha ku yaala Malå, qaban qaabiyaha waxbarashada, qaybaha dadweynaha sida laamaha iyo shaqooyinka dawlada, hay'addaha, ururka isutaga shaqaalaha wadanka iyo iyadoo degmooyinka iskaashi lala samaynayo, haddaanu nahay degmada Malå waxaanu saamayn ku yeelanaynaa horumarka magaalada Malå iyo tan gobolkaba.

Qolo kastaaba waxay leedahay cidkale oo ay iyagu la xiriiraan, inay si faahfaahsan oo gaar ah baahida u falanqeeyaa iyo iyagoo arrintaas u leh gundhig aqooneed, iyadoo kor loo qaadayo iskudubaridka iyo wada shaqaynta isku duwida guulaha, barashada iyo ururinta arrimaha ku saabsan caqabadaha wadajirka ah.wadashaqayntu waxay keenaysaa in waxlaga wada barto oo lays dhaafasado aqoonta khibradeed iyo su'aalaha khuseeya masruufka.

Lixda sanadood ee soo socda waxay degmada Malå u baahan yihiin inay shaqaaleeyaan 60 shaqaale: macalimiin, kalkaaliyeyaal caafimaad, dadka gudagala arrimaha dhismaha, macalimiinta dugiyada xannaanada iyo barbaariinta carruurta, sheefyada dugsiyada xannaanada iyo barnaarinta carruurta, dadka dhulka xaaqa, maamuleyaasha xafiisyada, dadka guryaha ilaaliya ee dhowra, dadka risebshanada ka shaqeeya, dadka ardayda dugsiyada caawiya, dadka mushahaarooyinka ka shaqeeya, ilaaliyeyaasha caafimaadka- iyo arrimaha bay'adda, dadka arrimaha guryaha gudagala, dadka dhaqaalaha caawiya, dadka arrimaha bulshada gudagala, sheef ka shaqeeya arrimaha daryeelka, dhaqaalaha, sheefka shaqaalaha iyo shirkadaha..

Qaybaha kale ee laamaha iyo shaqooyinka dawlada waxay raadinayaan:dhakhtar, dhakhtarka ilkaha, kalkaaliye caafimaad iyo qaarkale oo badan.

Wax soo saarka ganacsiga iyo wershadu waxay raadinayaan injineero, dadka dhaqaalaha yaqaana, injineerada diyaariya nidaamka barnaamijyada kumbiyuutarada, dadka IT horumarka ku sameeya, dadka mishiinada ka shaqaeeya, dareewaliin, cunto kaliyeyaal, farshaxan yaqaano, iyo dadka shirkadaha leh ama shaqo bixiyayaasha ah.

## Wax soosaarka ganacsiga iyo wershedaha Malå waa mid ballaaran och oo firfircoon

Degmada Malå waxa ka shaqeeya qiyaastii 400 oo shaqaale waxaanay ku kala qaybsan yihiin 70 xirfadood oo kala duwan waxaanu yahay shaqo bixiyaha degmada ugu weyn. Laanta dawlada ee kale ee laga shaqeeyo waa caafimaadka gobolka Västerbotten oo ay qiyaastii u shaqeeyaan 35 shaqaale. SGU oo ah Dhulbaadhayaasha wadanka Iswiidhan iyo Xafiiska shaqada oo ah qayb ka tirsan hay’addaha dawlada ee shaqa bixiyeyaasha degmada deggen.

Wax soosaarka ganacsiga iyo wershaduhu wuu kala duwan yahay. Halkan waxa deggen shirkado waaweyn sida BennysGräv AB, waa shirkad qandaraasyada qaadata oo ay u shaqeeyaan qiyaastii 130 shaqaale. Shirkado badan oo gaadiidka- iyo isgaarsiinta qaabilsan ayaa magaalada iyo nawaaxiga u dhowba deggen, waxaanay arrintaasi keenaysaa adeegyo wanaagsan oo dhinaca isgaarsiinta ka mid ah. Malå waxa kaloo deggen Setra Group, taas oo ah shirkada ugu weyn wadanka Iswiidhan oo ka shaqaysa alwaaxda waxay leedahay warshed faryaamo oo alwaaxda jarjarta oo ay ka shaqeeyaan 90 shaqaale waxaanay ku taalaa Malå.

Hultdin System waxa ka shaqeeya ilaa 70 shaqaale waana shirkada ugu horaysa dhinaca qalabka oo ay ku dhexdhisan yihiin aalado loogu talagay duurka- iyo mishiinada qandaraasyada. Guidline Geo waa shirkad dhinaca farsamada qaabilsan FoU oo ah shirkad.

Shirkadahaa kor lagu soo xusay waxa dheer inay jiraan 120 shirkadood oo yaryar oo iyagan fursado shaqo laga helayo dhinaca ganacsiga, cafimaadka, jimicsiga (wellness), dhaq-dhaqaaq ganacsiga dadka booqashada ku i manaya halka, ganacsiga dhirta, tamarta, ganacsiga cawsha waaweyn iyo gaadiidka. Masaafada tareenku waa ilaa 25 km, waxay ku taalaa Kristinabergsgruvan New Boliden.

Shaqooyinka banaan ee Xafiiska shaqada ee magaalada Malå waxaad ka heleysaa bogga internetka ee
https://www.arbetsformedlingen.se/

## Kalsoonida aayaha dambe iyo faa,iidooyinka booska

Shirkada halkan Malå iyo kuwa nawaaxiga u dho deggenba ganacsigu si wanaagsan ayuu ugu socdaa, taasina waxay abuuraysaa fursado horumar ah oo ka yimaada dhinaca wax soosaarka gacansiga iyo wershedaha iyo dhainaca degmadaba. Dad badan ayaa waxay doorteen inay bilaabaan shirkado ay iyagu leeyihiin, taasina muujinaysaa kalsooni fiican oo aayaha dambe leh..

Halkan waxa jira boosas laysku ballarinkaro oo uu qofk/shirkadu ka heleyso faa’idooyin khuseeya inay ku helaan qiimo jaban hanti ma guurto ah, guryo ama dhul. Eeriyada ama dhulka ay wershaduhu deggen yihiin waa la bad-baddelikaraa, dhulka banaana marba siday baahidu tahay ayaa laga dhigikaraa. Malå malaha sida Stockholm iyo Mälardalsområde miisaaniyada kharashka shaqaalaha.

Sidoo kale degmadu malaha kharashyo badan oo ay ku bixiyaan kirooyinka lokaalada ama guryaha ay kiraystaan waxaanay ku yaalaan meesha wadanka ugu wanaagsan (waxay ku yaalaan deggaanka mudan in lasiiyo taageerada dawlada A) – taas macnaheedu waxa weeye waxa jira fursado waaweyn inay shirkaduhu helaan kaalmo si ay maalgelin u sameeyaan dadna u shaqaaleeyaan.

Miyaad adigu xiisaynaysaa inaad shirkad ka furato magaalada Malå ama haddii aad hayso wax su’aalo ama fikrado kale, fadlan la soo xiriir qaybta qaabilsan horumarka, telefoonka 0953 – 140 00

**waxbarasho**

”Malå waxwaliba way kuu dhowyihiin”waxaan adeecayaa halkudhiga Malå, arrintaasi waa saxa markay noqoto dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo dugsiyada caadiga ahiba waxay ku yaalaan meel u dhow wadooyinka fiicfiican ee la maro marka la fuulayo ulaha barafka, buurta barafka, garoonka kubadda cagta, hoolka barafka iyo kan isboortiga-iyo hoolka dabaasha.

Waalidiinta carruurtoodada geeya dugisyada xannaanada iyo barbaariinta carruurta ama kuwa geeya carruurtooda dugsiyada Malå ku yaala, waxay dareemidoonaa in carruurtooda loo ilaalinayo oo ay meelo ammaana carruurtoodii kaga tageen waxaanay carruurtu helidoonaan caawimada ay u baahan yihiin si ay horumar ugu sameeyaan hadday noqoto aqoonta iyo arrimaha la dhaqanka dadka kale. Shaqaalaha ka shaqeeya dugsiyada xanaanada iyo barbaarinta carruurtu ee magaalaga Malå ku yaala waxay inta badan ka shaqeeyaan mashruucyo – mawduucyo waxyaabo kala duwan ka kooban. Mid ka mid ah dugsiyadaa xannaanada waxay tusaale ahaan ka shaqeeyaan mashruuc ku saabsan dhismaha guryaha, taas macnaheedu waxa weeye waxay shaqaaluhu u soo bandhigayaan inay ku casumaan carruurta bay’ad xiisogelinaysa dareenka carruurta si ay u dareemaan inay iyagu guryo dhisanayaan iyo luqadda samiga iyo dhaqankoodaba. Naxaanooyinka oo dhan waxa lagu isticmaalayaa bay’adda hodanka ah ee u dhow

Dugsiyada aasaasiga ah ee F-9 waxay ku wada yaalaan hal meel oo yar oo ah bartamaha magaalada. Dugsiyadaas marka carruurta wax la barayo waxa wax loo baraa iyagoo guruubyo yar yar ah, halkaas oo uu ardaywalba isagu shakhsiyan si gooni ah wax u baranayo isagoo ardaygu ka ambaqaadaya meesha uu isagu joogo. Dugsiga aasaasiga, dugsiga Nilaskolan, waxa lagu dhigaa is-dhexgalka samiga waxaanu dugsigu ardayda wax ku baraa waxbarashada waqooyiga-, koonfurta iyo tan umesamiska. Shaqaaluhu inta badan waa shaqaale haysta darjo la aqoonsan yahay miisaaniyadayada macalimiintuna way hoosaysaa oo kharash badan kuma bixino. Waxaanu sanado badan xooga saarnay inaanu shaqaalaha dugsiyada siino koorsooyin waxbarasho oo ay si wadjira u qaataan kuwaas oo aanu u bixinay waxbarashada gelinka dambe. Bishii halmar ayaa la sameeyaa, ujeeddaduna waa inay noqoto silsilada taas oo saameysa dugsiga aasaasiga ah oo dhan, si ay ardayda oo dhami u helaan shuruurdo wanaagsan si ay waxbarashadooda u sii wataan. Sanadadii ugu dambeeyey waxaanu ururinay qaybaha ay carruurtu u baahan tahay inay horumar ku sameeyaan: in marwalba ilmaha lala socdo oo la qiimeeyo meesha uu marayo, habka horumarka luqada iyo in laga shaqeeyo isku darka / isku jirka. Waxaanu kaloo hadda samaynaa in ardaykasta la siiyo kumbiyuutar isaga u

gooniya laga bilaabo fasalada 4 aad iyo wixii ka sareeya. Markay noqoto wax ku barashada IT dhinacaas aad ayaanu ugu horaynaa .

Mustaqbalka soo socda waxaanu u baahanahay inaanu shaqaalayno macalimiinta dugsiyada barbaarinta iyo xannaanada carruurta, macalimiinta dugsiyada, macalimiinta wakhtiga firaaqada, la taliyeyaasha waxbarasha- iyo shaqooyinka xirfadaha.

Miyaad ka fikirtay inaad u soo guurto Malå wixii su'aalo ah ee ku saabsan dugsiyada ama haddii aan xiisaynayso inaad ka shaqayso maamulka qaybta waxbarashada, fadlan la soo xiriir xafiiska dugsiyada telefoonka 0953-140 80.

## Dareelka caafimaadka iyo xannaanada

Degmada Malå waxay dadka ku casumaysaa daryeel caafimaad iyo xannaano tayo wanaagsan oo si fiican u shaqaynaysa leh halkaas oo qofkasta baahidiisa la qaabilayo lagana haqabtirayo. Degmada Malå marka shaqada laqabanayo koox ayaa shaqada qabata.

Degmadu waxay leedahay guryo khaas ah, guryaha dadka ilowshinyuhu ku dhaco (demensboende), u adeegida dadka gaboobay (hemtjänst), daryeelka caafimaadka guriga (hemsjukvård), iyo dadka u baahan adeega khaas ah ama asistanda.

Guryaha khaaska oo dhan waxa laga arkayaa dadka samiga, gaar ahaan markii xooga la saaray guryaha laysu geeyey ee dadka waaweyni deggen yihiin, halkaas oo ay samer badani deggen yihiin. Halkaa waxa ka dhaca aktiifiteetyo lagu dhiirigelinayo dadka samiga waxaanay degmadu shaqaalaysay hal qof oo arrimahaa qabta. Degmada waxa jooga guruub dad waaweyn ka kooban oo kulamo sameeya ujeeddaduna waa inay qoraalo qoraan oo ay ilaaliyaan aqoonta dadka samiga si ay jiilalka soo socdaa u tixraacaan.

Haddanu nahay degamda waxaanu xiriir khaasa la leenahay maamulka gobolka ee caafimaadka. Qaybta degdega ee dhaktarka degmada Malå waxay si wadajira u wada shaqeeyaan guryaha gaarka ee degmada.

Shaqaalaha oo dhan waxa lagu casumay shaqo joogto ah oo buuxda jadwalka shaqadana waxa lagu ameeyaa Time Care.

Xafiiska adeega arimaha bushada ee Malå waxay ku yaalaan bartamaha magaalada shaqaalaha xafiiska arrimaha bulshaduna shaqadoodu way is-bebedeshaa oo way kala duwan tahay waxaanay xiriir dhow la leeyihiin dadka macmiisha u ah iyo hay'addaha kale. Waxaanu leenahay koox yar oo wadashaqaysa, waanu is-caawinaa, waxbaanu kala baranaa anagoo xooga saarayna dadka macmiisha noo ah.

Dadka maamulka arrimaha bulshada ka shaqeeya ee magaalada Malå waxay kaloo xitaa leeyihiin fursado kale oo shaqo ah, waxa ka mid ah inay ka shaqaynkaraan guryaha lagu hayo dhalinyarada keligood wadanka timaada ee aan waalidkood la socon.

Miyaad xiisaynasaa inaad annaga noo shaqayso, fadlan soo wac telefoonka 0953-14000 ama iimayl u soo dir omsorgen@mala.se